



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

Hope Corps 2025: Tilmaamaha hawlgelinta Magalada hoose ee Seattle

Dulmarka Deeqaha

Xafiiska Fanka & Dhaqanka ee Seattle (ARTS) wuxuu ku martiqaadaa fanaaniinta gaarka ah, soo saarayaasha dhaqanka, maamulayaasha fanka, shaqaalaha hal abuurka leh, kooxaha bulshada, iyo ururada fanka iyo dhaqanka inay codsadaan Deeqda Hope Corps. Waxaad codsan kartaa adiga oo soo jeedinaya mashaariic u abuurta fursado shaqo xoog-shaqaale deegaanka ah, oo gacan ka geysta wanaagga bulshada magaalada hoose ee Seattle mashaariicda ay bulshadu wado, dhacdooyinka, bandhigyada, iyo in ka badan.

Hope Corps waxay doonaysaa inay ku xidho fannaaniinta aan si buuxda ushaqayn iyo kuwa aan shaqayn kuwa farshaxanka iyo kuwa hal abuurka leh fursado shaqo oo faa'iido u leh dadweynaha. Barnaamijka Hope Corps ee 2025 waa qayb ka mid ah [Qorshaha Dhaqdhaqaaqa ee Duqa Magaalada Bruce Harrell](#), maalgelintana waxa heli doontaa mashaariicda shaqaalaysiisa shaqaale hal abuur leh iyada oo loo marayo hawlgelinta xaafadaha hoose ee Seattle:

- 1) Belltown
- 2) Chinatown-international District
- 3) Central Downtown
- 4) Denny Triangle
- 5) Pioneer Square
- 6) Stadium District

Mashruucyada la soo jeediyay waa inay ahaadaan dhacdooyin ama dhaqdhaqaaqyo gaar ah, oo ka dhacaya 2025 Wadooyinka, la heli karo, bannaanka ama meelo kale oo si guud loo arki karo kuwaas oo siiya waayo-aragnimo soo jiidasho leh dadweynaha oo keenaya dhegaystayaal badhtamaha magaalada.

Deequhu waxay u dhexeeyaan **\$5,000 - \$50,000** si ay u taageeraan mushaharka shaqaalaha hal-abuurka leh iyo kharashyada mashruuca.

Macluumaadka iyo caawimaada arjiga, u-qalmitaanka ama taageerada farsamada khadka tooska ah kala xiriir Alex Rose, Maamulaha Barnaamijka Hope Corps, 206-459-6517 ama alex.rose@seattle.gov.

Waxaan haysanaa turjubaano ku gula hadli kara luqadaada, kuwaaso ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Nasoo wac oo noo sheeg luqadaad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan ka helayno turjumaan si uu ugu soo biiro wicitaanka.

Codsiga

Ka codso online iyada oo lagu soo gudbin karo: <https://seattlearts.submittable.com/submit>.

Haddii aadan haysan kombuyuutar ama internet, ama aad jeclaan lahayd inaad kala hadasho siyaabo kale oo loo codsado, la xidhiidh Alex Rose, Maamulaha Barnaamijka Hope Corps, sida ugu dhakhsaha badan: alex.rose@seattle.gov.

Taariikhda ugu danbaysa ee la codsan karo

Talaado, Sebtember 3, 2024, 5:00 galabnimo. Pacific

Fadlan sii wakhti ku filan marka aad u buuxinayso codsigaaga. Codsiyada la soo gudbiyay ka dib 5ta galabnimo (Pacific) ee waqtiga kama dambaysta ah lama aqbali doono.

U-qalmitaanka

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato maalgelinta Hope Corps haddii **adiga iyo mashruucaaga aad soo jeedisay aad buuxisaan shuruudaha soo socda:**

- Waxaad tahay farshaxanle shakhsi ahan, urur, ama koox Bulshada ku salaysan oo degan, ama si joogto ah uga soo bandhigta shaqada gudaha Seattle.
 - Ururada iyo fanaaniinta shaqiga ah ee matala bulshooyinka sida aadka ah uu u saameeyay cadaadiska nidaamka oo ay ku jiraan dadka dakhligoodu hooseeyo, dadka naafada ah, bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga, iyo bulshooyinka midabka leh ayaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan.
- Mashruucaagu waa inuu qabsooma inta u dhaxaysa Janaayo 2025 iyo Disembar 2025.
- Mashruucaaga iyo faa'iidada dadwaynaha ee la xidhiidha waa inay ka dhacaan gudaha Magalada hoose ee Seattle [xadka Qorshaha Hawlgelinta ee magalada hoose ee la aqoonsaday](#):
 - Belltown
 - Chinatown-international District
 - Central Downtown
 - Denny Triangle
 - Pioneer Square
 - Stadium District
- Mashruucaagu waa inuu ku saabsan yahay mid ama in ka badan oo ka mid ah saddexda ujeedo ee barnaamijkan.
- Mashruucaaga waa in la hormariyaa oo laga dhigaa mid ay heli karaan dadweynahu guud ahaan - dadka deggan Seattle, shaqaalaha, iyo booqdayaasha - si ay uga soo qaybgalaan. Tan waxaa ku jira ikhtiyaarka imaanshaha bilaashka ah iyo helitaan loogu talagalay dadka ku hadla luqadaha aan Ingiriisiga ahayn iyo dadka naafada ah. Haddii

aad u baahan tahay gargaar si aad dhacdadaada uga dhigto mid la heli karo, fadlan la xidhiidh alex.rose@seattle.gov.

- Mashruucaagu waa inuu siiya shaqaale kasta oo hal-abuur leh* mushahar lagu noolaan karo, hadday tahay mushahar, gunnooyin, ama bixinta qandaraasyada. Waxaan ku qeexnaa mushaharka nolosha \$32 saacaddii ama ka badan (tani way ku kala duwanaan kartaa dhalinyarada iyo ardayda).
- Mashruucaagu waxa laga yaabaa in uu leeyahay qayb fogaan ah, laakiin waa in uu ugu horrayn ahada daawasho qof ahaaneed.
- Haddii mashruucaagu yahay rakibaad farshaxan oo ku meel gaar ah, waa in la soo bandhigaa ugu yaraan 3 bilood.

***Shaqaalaha hal abuurka leh** waxaa ka mid ah fannaaniinta, hal-abuurka, shaqaalaha dhaqanka, iyo qof kasta oo intaas u dhexeeya.

Maalgelinta

Qadarka maalgelintu waxay u dhaxaysaa **\$5,000 - \$50,000**.

Waxaad u isticmaali kartaa lacagaha abaal-marinta khidmadaha fannaanka, suuq-geynta iyo khidmadaha xayaysiinta, maamulka mashruuca iyo kharashaadka shaqaalaha, saadka, kirooyinka qalabka ama kharashyada kale ee la xiriira wax-soo-saarka, caymiska loo baahan yahay, iyo wax aan ka badnayn 10% kharashyada la xiriira cuntada. Kharashyo dheeri ah ayaa laga yaabaa in la ogolaado hadii uu ogolaado maamulaha mashruuca deeqda.

Aqoon isweydaarsiyada macluumaadka

Wax badan ka baro deeqdan iyo sida loo gudbiyo arjigaaga ugu wanaagsan.

Aqoon iswaydaarsi 1 (Khadka)

Talaado, Luulyo 30, 2024, 10:00 - 11:00 subaxnimo.

[Isku xirka RSVP](#)

Aqoon iswaydaarsi 2 (qof ahaan gudaha Pioneer Square)

Isniinta, Agoosto 5, 2024, 6:00 - 7:30 p.m.

[Isku xirka RSVP](#)

Aqoon iswaydaarsi 3 (Khadka)

Khamiis, Agoosto 15, 11:30 subaxnimo - 12:30 galabnimo.

[Isku xirka RSVP](#)

Aqoon iswaydaarsi 4 (qof ahaan gudaha Belltown)

Sabtida, Agoosto 17, 11:00 subaxnimo - 12:30 galabnimo.

[Isku xirka RSVP](#)